IIB MA GALO

# FAAFIN RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

الجمهورية الصومال الديمقراطيه

Sannadka 9aad Muqdisho 1 Jannaayo 1981 Lr. 1

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريده شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

**OIIMAHA** : waa 5 shilin lambar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya **udaheeda** — **dibedana** waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu . **bilaabmaa** 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàı wàà 2 ɔa **Sh.** — **Rukunka iyo qoritaanku** waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmi a ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 1 ee 13Jennaayo 1980, Dhismaha Warshadda Habka Cusub D/Hoose ee Xamar. **Bogga** 2

SHARCI L.2 ee 4 Disember 1980, Gunnooyinka lagu qaadanayo Jagooyinka kala duwan. » 12

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 1 ee 1 Nof. 1980, Magacaabid Guddoomiye ku xigeen MDB, J/le G/Sare Maxamed Dhaqane. » 18

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 2 ee 3 Dis. 1980, Oggolaansho Heshiis Abuuraya Ururka Carbeed ee Macaadinta. » 19

QAYBTA 3AAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII.

Madbacadda Qaranka

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI, L. 1 ee 13 Jen. 1980, Dhismaha Warshadda Habka Cusub D/Hoose ee Xamar:

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. yahay 46 ee 16.9.1979, kaasoo lagu dhaqan geliyey Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lamb. yahay 28 biis ee 21-2-1976 iyo wax ka beddelaadda ka dambeysa ee lagu maamulo shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho;

ISAGOO TIXGELIYEY kaalinta Warshadda habka cusub ay kaga aaddan tahay xagga horumarinta shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho;

ISAGOO U ARKAY : lagama maarmaan in warshaddahabka cusub ee lagu soo wareejiyey D/Hoose loo sameeyo sharci la xiriira dhismaheeda, isla markaasna la waafajiyo dhismaha qaabka shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho, ee lamb.yahay 28 biis ee 21.2.1976;

ISAGOO TIXGELIYEY : Talo jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho ee ku saabsan dhismaha warshadda habka cusub.

WUXUU SOO SAARAY XEERKA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

DHISMAHA WARSHADDA

1) laga bilaabo maalinta Madaxweynaha saxiixo, waxaa sharcigan loo aqoonsan doonaa sharcigii dhismaha warshadda habka cusub ee D/Hoose, taasoo ka mid ah warshadaha D/Hoose, waxayna maamul ahaan hoos timaadaa qaybta Maaliyadda iyo Warshadaha D/Hoose.

2) Warshadda waxaa lagu maamuli doonaa sharcigan iyo Xeer nidaamiyaha Guddiga Maamulka D/Hoose ee lamb. yahay 83 ee 18.10.78 iyo Xeerka lamb. yahay 28 biis ee 21.2.1976 iyo wax ka beddelinldii ka dambeysay ee lagu dhaqo shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho.

## QODOBKA 2AAD

Warshaddu waxay yeelan doontaa Guddi maamul oo u xil saaran fulinta dhammaan hawlaha la xiriira socodsiinta warshadda, Magacaabidda Guddi maamulka ee warshadda iyo xaddadaadda awoodooda sharci ahaaneed, waxaa lagu soo saari doonaa Xeer nidaamiye u gaar ah.

## Qodobka 3aad

### XARUUNTA & LAAMAHA WARSHADDA

Xaruunta Warshaddu waxay ahaan doontaa Magaalada Muqdisho, waxayna laamo ku yeelan kartaa Gobollada iyo Degmooyinka JDS haddii ay lama huraan u noqoto danta warshadda.

## QODOBKA 4AAD

### UJEEDDO WARSHADDA

Ujeeddooyinka asaasiga ah ee loo abuuray Warshadda waa kuwan hoos ku qoran:

1) In ay asaas u noqoto, horumarinta ka dhaliso xagga farshaxanka dhar tolidda Magaaladan Muqdisho.

2) In ay soo iibsato alaabta Ceeriin ee lagama maarmaanka u ah tolliinka dharka, galuusyo, dun, jinyeero iyo wax allaale wixii qalab wax soo saar ah, taasoo ku xirnaan doonta baahida Warshadda.

3) In ay siiso mudnaansho gaar ah tolliinka Unifoomka Shaqaalaha Dawladda iyadoo tixgelineysa hadba dalabaadka iyo ballan qaadyada lacageed is-raacsan ee ka yimaada Hay'adaha Dawladda.

4) In ay ku dadaasho soo saaridda dhar bilic-san oo qiimo jaban ee waxtar u leh dadweynaha.

## Qodobka 5aad

## AWOODDA

Warshaddu waxay leedahay iyadoon ku xad gudbin sharcigan iyo shuruucda kaleba awood ay ku fulin karto ujeeddooyinka ku xusan Qod. 4aad ee Sharcigan.

## Qodobka 6aad

## KORMEERKA GUUD

1) Warshaddu waxay hoos timaadaa D/Hoose ee Muqdisho, waxaana Kormeerkeeda yeelan doona Duqa Magaalada Muqdisho oo awood buuxda u leh xagga jaangooyideeda (qorshaha), horumarinta, dhaqaalaha iyo heshiisyada ganacsiga oo ay warshaddu galayso.

## Qodobka 7aad

## HABKA DHISMAHA WARSHADDA

Warshaddu waxaa u madax noqon doona Agaasimaha, isla markaana ka koobnaan doonta, xubno, laamo iyo Faracyo fuliya hawsha ballaaran oo ay warshadu u xil saaran tahay.

## Qodobka8aad

## MAGACAABIDDA XILKA

1) Agaasimaha iyo Shaqaalaha oo darajadoodu tahay (A iyo B) waxaa lagu magacaabi doonaa Xeer uu soo saxiixay Madaxweynaha JDS, isagoo dhegeystay tala jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho.

2) Shaqaalaha darajadoodu tahay (C iyo D) waxaa lagu magacaabi doonaa Xeer uu saxiixay Duqa Magaalada Muqdisho, isagoo dhagaystay tala jeedinta Ku/ha Duqa Magaalada ee Qaybta Maaliyadda iyo Warshadaha.

Qodobka 9aad

XILKA AGAASIMAHA

1) Agaasimaha wuxuu u xil saaran yahay isagoo matalaya Warshadda in uu fuliyo ujeeddooyinka ku xusan Qod. 4aad ee Sharcigan. hawshiisuna waxay u qaybsantaa.

b) wuxuu mas'uul ka yahay habka maamulka Shaqaalaha Warshadda.

t) wuxuu mas'uul ka yahay Maamulka lacagta Warshadda.

j) In uu ku dhaqaaqo wixii qaraar deg deg ah, isla markaasna ogeysiinaya Duqa Magaalada iyo Ku/ha Duqa Magaalada ee Maaliyadda iyo Warshadaha ee Warshaduhu hoos timaado.

x) In uu bixiyo wixii amar laga maarmaan ah, si hawsha la xiriirata maamulka Guud iyo xisaabaadkuba ay ugu socdaan habka wanaagsan.

kh) In uu fuliyo hawl maalmeedka caadiga ah ee Warshadda.

d) In uu fuliyo hawl maalmeedka aan caadiga ahayn, isagoo oggolaasho qoraal ah ka haysto Duqa Magaalada Muqdisho.

2) Marka Agaasimuhu ka maqan yahay warshadda ama ay jiraan asbaabo ka reebaya gudashada xilkiisa, waxaa hawsha sii fulin doona sarkaal ka tirsan shaqaalaha D/Hoose oo uu magacaabay Duqa Magaalada Muqdisho.

Qodobka 10aad

XUQUUQDA QAYNUUNIGA & DHAQAALE EE WAR.

1) Qaabka gaar ahaaneed iyo tirada shaqaalaha ka shaqeyn doona warshadda waa kuwa ka muuqda lifaaqa halkan ku xiran oo yeelan doona astaan sharci.

2) Xuquuqda qaynuuniga ah iyo tan shaqada ee Agaasimaha, Xubnaha, Xeerka lamb. yahay 28 biis ee 21.2.1976 iyo wax ka beddelaaddii ka dambeysay ee lagu dhaqo shaqaalaha D/Hoose Muqdisho.

Qodobka 11aad

HATIDA WARSHADDA

Hantida Warshaddu waxay ka kooban tahay wax alla wixii hanti ah ee ka kooban guurto iyo ma guurto ee hadda warshaddu leedahay;

1) Wixii kaalmo ah oo ay warshadda u fidiyaan Hay'ado gudaha ama caalami ah.

Qodobka 12aad

MIISANIYADDA WARSHADDU

1) Xisaabta sannadka;
XISAABTA SANNADKA WAXAY KA BILLAABANAYSAA: 1da Jannaayo, waxayna ku dhammaanaysaa 21ka bisha Diseember ee sannad walba.

2) MIISAANIYADDA SOCOTA:

Agaasimuhu marka ay tahay 30ka bisha Oktoobar ama inta ka horreysa waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyadda qiyaasta sannadka soo socda, isagoo faahaafhinaya, kuna muujinaya lacagta soo geli doonto ama ka bixi doonta warshadda sannadka soo socda, wuxuuna soo hor dhigi doonaa Duqa Magaalada Muqdisho, si uu u waafajiyo hab raaca la xiriirsan oggolaanshadeeda.

3) XIRITAANKA MIISAANIYADDA:
Agaasimuhu marka ay tahay 31ka Maarso ama inta ka horreysa ee sannad walba, waa in uu

isku dubbariddaa xiritaanka miisaaniyadda ee sannadka la soo dhaafay isagoo isku hagaajinaya warshadda uuna soo hordhigo.

Qodobka 13aad

AMAAH

Warshaddu si ay u gudato waajibaadka ku tilmaaman Qod. 13aad ee sharcigan, waxay qalab ama lacag ka amaahan kartaa hay'ado caalami ah ama Bankiyada gudaha ee dalka JDS.

Qodobka 14aad

HABKA XISAABAADKA

Xisaabaadka Warshadda waxaa xukumaya oo laga baari doonaa habka u degsan xisaabaadka Wakaaladaha iyo Warshadaha Dawladda.

Qodobka 15aad

Sida uu qabo qod. 17aad, Xeerka lamb. yahay 28 biisee 21.2.76 Agaasimaha iyo shaqaalaha kale ee ka hawl qabta warshadda ma geli karaan ganacsiga amase farsamooyin lid ku ah danaha warshadda iyo tan D/Hoose eeMuqdisho.

Qodobka 16aad

XEERKA GUUD

Madaxweynaha JDS, wuxuu awood u leeyahay in isagoo dhagaystay tala jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho, uu soo saaro Xeer nidaamiye habeya Warshadda si looga hor tago dhibaatooyinka ka imaankara waxyaabo aan sharcigan ku sheegnay.

Qodobka 17aad

TIRTIRID

Sharci ama Xeer kasta ee sharciga ka soo hor jeeda ama aan la socon karin waa la baabi'iyey.

Qodobka 18aad

DHAQAN GELID

1) Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee JDS.

2) Sharcigan wuxuu ka mid noqon doonaa sharci-yada rasmiga ah ee Dalka JDS.

3) Qof walba waa in uu dhowraa oo tixgeliyaa, kuna qasbaa dadka kale in ay dhowraan sharcigan.

**Muqdisho, 13 Jen. 1980**

MADAXWEYNAHA, J.D.S.

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre